



Farrriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Abril 29, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo hawl wadaagayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: NCI oo soo saartay warbixinta “Warbixinta Ra’yi ururinta Xasiloonida Shaqaalaha” oo loogu talagalay guryaha koox ahaanta loo degan yahay

Shaqaale xasilooni wuxuu muhiim u tahay taageerida dadka qaba (I/DD) si ay nolol buuxda ugu noolaadaan bulshadooda dhexdiisa oo loo xaqiijiyo caafimaadkooda iyo badbaadadooda.

Hal dariiqo oo ODDS ku qiimeyso xasiloonida shaqaalaha Xirfadlayaasha ah ee Taageerada Tooska ah (DSP) waa iyada oo la adeegsanayo ra’yi ururinta Muujiyayaasha Xudunta u ah Qaranka (NCI). NCI waa dadaal wada shaqayneed oo ka dhexeeya Ururada Qaranka ee Agaasimayaasha Gobolka ee Adeegyada Naafanimada Koriinka iyo Machadka Cilmi-baarista Adeegyada Dadweynaha.

### **Warbixin gaar ah oo la soo saaray: Daryeel bixiyayaasha guryaha koox ahaanta loo degan yahay 24-ka saacadood**

NCI ayaa dhawaan soo saartay warbixinta gaarka ah ee “Warbixinta Ra’yi ururinta Xasiloonida Shaqaalaha ee 2020: Hay’adaha Bixiya Daryeelka Guriga Koox ahaanta Loo degan yahay ee Oregon” oo ay ku jiraan hay’adaha bixiya daryeelka guriga koox ahaanta loo degan yahay ee 24-saacadood ah ee ka tirsan Nidaamka I/DD ee Oregon. Tani waa ra’yi ururin muhiim ah sababta oo ah waxay ODDS iyo hay’adaheeda bixiya daryeelka ka caawisaa in ay si wanaagsan u fahmaan xasiloonida shaqaalaha DSP ee hadda jira iyo si loo sameeyo horumar iyada oo la adeegsanayo siyaasad ama isbeddel lagu sameeyo barnaamijka.

Warbixinta ayaa la haleyaa [in laga akhristo dhanka internet-ka iyada oo ku qoran Ingiriisi](#). Wixii la xiriira luqadaha kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811.

Halkan waxaa ku qoran dhawr qodob oo muhiim ah:

- 155 oo ah hay'adaha bixiya daryeelka ee ka tirsan nidaamka I/DD ee Oregon ayaa ka qayb qaatay, oo ay ku jiraan Kooxda Xasilinta Dhibaatooyinka ee ODDS (SACU).
- Tirada guud ee DSP-yada ay shaqaaleysiiyeen hay'adahani waxay ahaayeen 8,732 laga soo bilaabo Diisambar 31, 2021.
- Markii u horreysay, NCI ayaa raacisay macluumaadka qaab-dhismeedka ee ku saabsan jinsiyada, qowmiyadda iyo aqoonsiga jinsi ahaaneed. 133 oo ah hay'adaha bixiya daryeelka oo ka jira Oregon ayaa bixiyay macluumaadkani:
  - 37% Caddaan ah, 22% aan la garanayn, 21% Madow ah, 9% Latinx, 4% in ka badan hal jinsiyad ama qowmiyad, 3% Jasiiraddaha Baasifiga, 2% Aasiya ka soo jeeda, 2% kuwo kale, 1% Dadka dhulka loogu yimid.
  - 57.3% dheddig, 34.6% lab, 7.8% aan la garanayn, 0.3% aan ku dhaqmin jinsiga 'gender nonconforming' ama kuwo kale.
- Celceliska mushaharka lagu bilaabay ee loogu talagalay DSP-yadu wuxuu ahaa \$13.83. Celceliska mushaharka saacadii la qaato wuxuu ahaa \$14.89.
- Heerka shaqo ka tegida/beddelaada shaqaaluhu wuxuu ahaa 55.9%. 24.2% oo ka mid ah DSP-yada waxa la shaqaaleysiiyay in ka yar lix bilood. 58.6% oo ka mid ah DSP-yada waxa la shaqaaleysiiyay muddo 12 bilood ah ama ka badan.

**Wakhtiga kama dambaysta ah ee loo qabtay ra'yi ururinta hadda jirta ee loogu talagalay dhammaan daryeel bixiyayaasha guriga koox ahaanta loo degan yahay.**

Dhammaan daryeel bixiyayaasha guriga koox ahaanta loo degan yahay ee shaqaaleysiiya DSP-yada la soo shaqeeyay dadka waaweyn ee 2021 **ayaa looga baahan yahay in ay ka qayb qaataan Ra'yi ururinta Xasiloonida Shaqaalaha OR NCI ee 2021**, sida ay dhigayaan Xeerarka Maamulka Oregon (OAR-yada).

- Bisha Maarso, daryeel bixiyayaashu waxay ahayd in ay helaan email cinwaankeedu yahay "Ra'yi ururinta Xasiloonida Shaqaalaha OR NCI ee 2021" oo ka socda [staffstability@hsri.org](mailto:staffstability@hsri.org).
- Email-ka waxa ku jira meel u gaar ah daryeel bixiyaha oo laga sii gelayo ra'yi ururinta.
- Ra'yi ururinta waa in lagu buuxiyaa muddo aan ka dambeyn Juun 30, 2022.
- Haddii aadan helin farriinta ra'yi ururinta oo aad u baahan tahay meel laga sii gelayo ra'yi ururintaada, Julie Hoyt kala xiriir [julie.hoyt@dhsosha.state.or.us](mailto:julie.hoyt@dhsosha.state.or.us).

## Sida ay ODDS u isticmaasho ra'yi ururinta NCI

ODDS waxay u isticmaashaa ra'yi ururinta soo ururinta xogta si loo buuxiyo shuruudahani:

- Oregon Sharciga Oregon (ORS 433.434) ayaa daryeel bixiyayaasha guriga koox ahaanta loo degan yahay ee I/DD uga baahan in ay buuxiyaan ra'yi ururinta xasiloona shaqaalaha si loogu wargeliyo go'aanada siyaasadeed ee mustaqbalka iyo taageerada wada hadalada dhanka maalgelinta ee lala leeyahay Sharci dejinta.
- Waxaa intaasi dheer, sida uu dhigayo OAR 411-325-025(4)(a): "Adeeg bixiye waa in uu xogta shaqaalaha ee sanadlaha ah u gudbiyaa ururka warbixinta ra'yi ururinta oo qaran ahaan la dejiyay ee ay qeexday Waaxdu. Daryeel bixiyayaasha guriga koox ahaanta loo degan yahay ee 24-saacadood ah ee aanan buuxin ra'yi ururinta waxaa dhici karta in ay mutaan ciqaab madaniga ah sida uu dhigayo OAR 411-325-0460(2)(a)(A)."

Waad mahadsan tiihin dhammaan intii ka qayb qaadatay ra'yi ururintani muhiimka ah.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).